

## **Magangelyoddoone: Xuquuqdaada shaqo qabasho waa la sii ballaariyay si kumeelgaar ah, haddii aad qabato shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka**

Sharcigii ku saabsanaa xuquuqda shaqo qabashada qofka magangelyoddoonka ah si kumeelgaar ah ayaa loo beddelay laga bilaabo 29. 06. 2020. Sharcigu waxaa uu shaqeyn doonaa illaa iyo 31.10.2020. Isbeddelka sharcigaan waa mid si kumeelgaar ah u sii ballaarinaya xuquuqda qabashada shaqooyin-xilliyeedka ee qofka magangelyoddoonka ah.

Isbeddelku wuxuu khuseeyaa shaqooyin-xilliyeedka dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) iyo waxsoosaarka kalluunka. Waxaa tusaale ahaan ka mid ah hawlaha soo socda:

- Shaqooyinka la xiriira waxsoosaarka dhulka sida, dhir beerista, waxsoosaarka quudka xoolaha, iyo daryeelka xoolaha dajjoogta ah (guriga lagu xannaaneeyo)
- Shaqooyinka la xiriira beerguriyeedka ee laga dhex qabto beeraha caadiga ah iyo qolal beereedka khudaarta lagu beero
- Shaqooyinka la xiriira xirfadda kalluumaysiga iyo korintiisaba, shaqooyinka la xiriira diyaarinta dhulbeereedka lagu beeraayo cunnooyinka kala duwan
- Hawlaha kala duwan ee laga qabto keymaha sida geedo fariisinta, beersita geedaha, geedo goynta, laamaggoyska, cabbirka, gurista geedaha iyo qaadistoobada.

### **Maxaa isbeddelay?**

- Haddii aad codsatay badbaadada caalamiga ah, kahor inta uusan sharcigu dhaqangelin 29.06.2020, Waxaad isla waqtigaaba leedahay xuquuqda shaqo qabasho ee shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka. Lagaagama bahna in aad sugto 3 ama 6 bilood, kahor inta aadan bilaabin shaqooyinka la xiriira xirfadahaas.
- Xuquuqdaada shaqo qabasho ee shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka waa ay sii soconaysaa tan iyo inta aad ka heleyso ama leedahay adeegyada xerada qaxootiga. Taa waxaa laga wadaa in xuquuqdaada shaqo qabashada aysan ku ekeyn ama ku dhammaaneyn, marka uu go'aanka diidmada ah ee laga gaaray codsigaagii magangelyoddoonka qaxootinnimada uu noqdo mid dhaqangal ah, oo loola jeedo marka sida sharciga uu dhigaayo adiga dalka laga saari karo.

- Waxaad ugu muujin kartaa shaqo bixiyahaaga xuquuqdaa shaqo qabasho ee shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka, adigoo tusaaya kaarkaaga macmiilka (kelyantiga) xerada qaxootiga ee mudadiisu ay wali shaqeyneyso.

## Isbeddelkaan ma khuseeyo dhammaan dadka magangelyoddoonka ah

Isbeddelkaan kuma khuseeyo adiga, haddii xaaladdaadu ay la mid tahay **mid ka mid ah arrimaha soo socda:**

- Haddii aadan heynin shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka.
- Aad codsatay magangelyoddoonka ama aad sameysay codsiga ku celinta ee cusub, kaddib markii uu dhaqangalay sharcigaan 29. 06. 2020.
- Sidoo kale waxaad ogaataa, in xuquuqdaada shaqo qabasho aanay soo noqoneynin ama dib loo soo celin karin, haddii ay ku joogsatay ama dhammaatay sabab la xiriirta dhaqangalka go'aanka ku saabsan dal ka saarista, kahor inta aanu dhaqangelin sharcigaan 29. 06. 2020.

Haddii isbedelka sharcigaan uusan adiga ku khuseynin, Waxaad warbixinta dheeraadka ah ee ku saabsan xuquuqda shaqo qabashada qofka magangelyoddoonka ah ka akhrisan kartaa boggeena internetka: [migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus](https://migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus).

## Inta uu sharcigaan shaqeynaayo, waxaad xuquudaada shaqo qabashada ee shaqo-xilliyeedka ku muujin kartaa, adigoo tusaaya kaarkaaga macmiilka (kalyantiga) ee xearada qaxootiga

Waajibka saaran shaqo bixiyaha waa in uu hubiyaa, in qofka shaqaalaha ah uu xaq u leeyahay in uu ka dhex shaqeyn karo dalkaan finland iyo inkale. Sidoo kale waxaa adiga kugu waajib ah inaad si dhakhso ah ugu sheegto shaqo bixiyahaaga, haddii xuquuqdaada shaqo qabashadu ay kaa dhammaatay.

Haddii aad hesho shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka, waxaad xeradaada qaxootiga ka codsataa kaar cusub oo ah kan macaamiilka (kelyantiga). Tan iyo inta sharcigaasu uu ka shaqeynaayo, waxaad shaqo bixiyahaaga tusi kartaa kaarkaaga macmiilka xerada qaxootiga, kaasoo caddeynaaya xuquuqdaada shaqo qabasho ee shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka. Kaarku wuxuu shaqeynayaa illaa iyo 31.10.2020. Waxaa intaa dheer oo kaarkaaga ku dhaggan istiikar muujinaaya in aad leedahay xuquuqda shaqo qabasho ee shaqooyinka la xiriira dhulka, keynta, beerguriyeedka (jardiinooyinka) ama waxsoosaarka kalluunka. Istiikarka waxaa ku qoran: Shaqo-xilliyeed 2020 iyo [migri.fi/tyo-oikeus](https://migri.fi/tyo-oikeus) (migri.fi xuquuqda shaqo qabasho)